

Maxaad Caruurtaada ka bari kartaa 9-1-1 ka

Caruurtaadu ma yaqaanaan sidii ay gargaar u heli lahaayeen haddii ay khatar ku timaado?

- ◆ Caruurtaada bar sidii ay u heli lahaayeen gargaar deg-deg ah haddii ay xaalad khatar ha la soo gudboonaato
- ◆ Caruurtaada bar addareyskooda iyo taleefoonkooda, sida ugu dhaqsiyaha badan ay ku baran karaan. Ku dul dheji taleefoonada dushooda addareyska iyo lambarka taleefoonka haddii aysan hubin.
- ◆ U sheeg in ay caruurta ka jawaabaan dhamaan su'aalaha wareystaha gargaarka deg-degga ah, ayna isa saarin taleefoonka illaa uu wareystuhu fasaxo.
- ◆ U sheeg caruurta khatarta ay leedahay haddii ay sabab la'aan wacaan 9-1-1.

Waa maxay khatarta ay leedahay haddii la waco 9-1-1 sabab la'aan?

Wacidda 9-1-1 ee sabab la'aan ahi waxay khasaarineysaa wakhti iyo lacag, waxay kalooy keeni kartaa khatar. Haddii leenka 9-1-1 ka lagu mashquuliyo macno darro qof si dhab ah gargaar ugu baahan ayaan helayn gargaarka deg-degga ah.

9-1-1

ISTICMAAL OO HA KU FALAADIN



SP 227 06/02 Somali

GARGAARKA DEG-DEGGA

DABKA



BOOLISKA



AMBALANSKA



9-1-1

WAG AMA GARAAC 9-1-1

ADEEGGA GARGAARKA DEG-DEGGA

- ◆ DAB
- ◆ FAL DEMBI DHACAYA
- ◆ GARGAAR CAAFIMAAD OO DEG-DEG AH

Maxay tahay?

9-1-1 waa lambarka taleefoonka guud ee gargaarka deg-degga looga qaylodhaansho si loo helo adeegga gurmada Abmbalanska, Booliska iyo Dabka. Waana adeeg laga helo magaalada Toronto, 24 saac maalin walba.

Goormaan isticmaali karaa?

Marka nabadgelyada iyo badbaadada qof ama hanti ay khatar ku jirto. Tusaale: waxyaabaha aad 9-1-1 ka u isticmaali kartid waxaa ka mid ah: Dab, Fal dembyeed dhacaya ama qof u baahan gargaar caafimaad oo deg-deg ah.



Ka soo qaad in aa boolis u baahantahay lakiinse aaney ahayn deg-deg?

Haddii aay cabashadaadu ahayn mid u baahan in lagu soo gurmado, wac 416-808-2222 wax alaale wixii aan halis u ahayn naftaada ama hantidaada, sida dacwooyinka ku saabsan goobaha baabuurta la dhigto, buuqa xafladaha, iyo baadi la helay.

Xog warran isticmaalka 9-1-1

Is deji hadalkaadane ka dhig fasiix. Sheeg nooca gurmada aad u baahantahay (Boolis, Dab-demis ama Gargaar Caafimaad), una diyaar garow in aad ka jawaabto su'aalahan:

- ◆ Maxaa dhacay
- ◆ Waa meel ma
- ◆ Sheeg magacaaga, meesha aad deggantahay iyo taleefoonkaaga ba.

Fadlan ku jir leenka si aad u bixisid wixii xog warran dheeraad ah haddii wareystuhu u baahaado. **HA DHIGIN TALEEFOONKA** illaa uu wareystuhu kaa fasaasaxo.

Maxaa dhacaya haddii aanad af ingariisi ku hadlin?

Aad ayeey u fiicantahay in aad sheegtidid luqadda aad ku hadasho. Kadib waxaad maqli doontaa shanqar iyo wadahalaf af ingariisi ah muddada uu xiriiriyaha taleefoonka, uu kuugu xiraayo tarjumaanka. Tiro ku dhow 140 luqadood ayaa tarjumaan loo helayaa.

Wiciddaa Lambarka Gurmada Deg-degga Waa Lacag La'aan

Waxaad lacag la'aan ka wici kartaa 9-1-1 taleefoonada lacagta lagu rido iyo kuwa gacanta ba, meel kasta ee aad ka joogtid magaalada Toronto



TDD/TTY (Qalabka Taleefoonka Dhegoolaha)

Haddii ay xaalad khatar ah kuugu timaado aad dooneysid in aad ku xirato TTY ga, horta wac 9-1-1, ka dibna si is daba joog ah waxaad u garaacdaa (space bar) ka, kuna celceli illa aad jawaab ka heshid.

Marka aan deg-degsiinyo jirin wac 416- 467-0493, riix batanka (space bar) ka, kuna celceli illaa lagaaga jawaabo.